



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Guddiga Qaran Ka-hortaga Lacag dhaqida & La-dagaalanka Maalgelinta Argagixisada National Anti-money laundering And Counter Terrorism Financing Committee (NAMLC)

SUM: GQKL/LMA/004/2026

TR: 13/10/2026

Liiska Cunaqabateynta Maaliyadeed

Guddiga Qaran ee Ka-hortagga Lacag-dhaqidda iyo La-dagaallanka Maalgelinta Argagixisada, oo fulinaayo waajibaadkiisa sharci, isla markaana tixraacaya qodobka 6aad ee sharciga cunaqabataynta maaliyadeed ee cayiman iyo qodobka 7aad ee xeer-nidaamiyihiisa ee khuseeya aqoonsiga iyo astaynta shakhsiyaadka lala xiriiirinaayo falalka argagixisada iyo maalgelintooda, iyo xayiraadda lacagaha iyo hantida shakhsiyaadka la asteeyey;

- Guddiga Markuu tixraacay qodobka 7aad ee xeer-nidaamiyaha sharciga cunaqabataynta maaliyadeed ee cayiman ee khuseeya xayiraadda iyo mamnuucidda isticmaalka, wareejinta iyo ka faa'iidaysiga lacagaha iyo noocyada kale ee hantida;
- Markuu arkay oo qiimeeyey xogaha, macluumaadka iyo caddeymaha loo soo gudbiyey ee la xiriira shakhsiyaadka lagu tuhunsan yahay inay ka tirsan yihiin, xiriir la leeyihiin ama la shaqeeyaan ururka argagixisada ah ee Al-Shabaab, isla markaana ku lug leh bixinta ama fududeynta taageero maaliyadeed oo loo adeegsaday ama loogu talagalay maalgelinta argagixisada, fulinta falal argagixiso ama taageeridda ururrada argagixisada;
- Markuu ku arkay caddeymaha iyo macluumaadka la soo bandhigay, isla markaana uu xaqiijiyey in ay jiraan sababo ku filan oo sharci ahaan saldhig u noqon kara astaynta shakhsiyaadka ay khuseyso, si waafaqsan shuruudaha iyo habraacyada uu dhigayo Sharciga Cunaqabataynta Maaliyadeed ee Cayiman iyo Xeer-nidaamiyihiisa;

ayaa Guddigu ku daray shakhsiyaadka hoos ku xusan Liiska Qaran ee Cunaqabataynta Maaliyadeed ee Cayiman:-

1. Abdiaziz Hassan Mohamed “Laftagareen”
2. Hassan Abdulkadir Mohamed
3. Mahad Abdirahman Adan “Shub”
4. Ibrahim Adan Ali “Najah”
5. Hassan Abdi Mohamed “Ugaas Hassan”
6. Abdullahi Ali Watiin
7. Abdifatah Mahad Abdirahman
8. Abdimajid Mowlid Hassan
9. Amiin Mad Daruur
10. Abshir Aden Isak

Sidaa darteed, dhammaan hay’addaha warbixinada ee ku xusan qodobka 4aad ee sharciga ka-hortaga lacag dhaqidda & la-dagalaanka maalgelinta argagaxsida, muwaadiniinta Soomaaliyeed & shaqsiyaadka ama hay’addaha kale ee jooga gudda Soomaaliya:-

- 1) Waxaa ka reeban in ay la macaamilaan shaqsiyaadka ku jira liiskan
- 2) Waxaa waajib ku ah in ay xayiraan hanti kasta ay leeyihiin shaqsiyaadka ku xusan liiskan;
- 3) Waxaa sidoo kale waajib ku ah in warbixin deg deg ah ee dhaqdhaqaaqyada (transactions) shaqsiyaadkan u diraan Xarunta Warbixinada Maaliyadda, Financial Reporting Center (FRC).

Dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed waxaa lagu wargelinayaa in ay mamnuuc tahay xiriir kasta oo dhaqaale ama fududayn ah oo loo sameeyo shaqsiyaadka kor ku xusan, iyada oo ciddii jebisa go’aanka Guddiga lala tiigsan doono xeerarka la-dagaallanka argagaxisada ee dhaqangalka ah.

Wabillaahi towfiiq

**Guddiga Qaran Ka-hortaga Lacag dhaqida & La-dagaalanka Maalgelinta
Argagaxisada (GQKL/LMA)**

E-mail: info@namlc.gov.so